


Sidee bey jadeecadu u faafi-og tahay?



Joe wuxuu ku noolyahay Seattle. Wuxuu dhawaan u safray debedda halkaas oo uu kasoo qaaday jadeeco.



Waxaan u socdaa rugta caafimaadka. Aad baan u xanuunsanahay

Joe wuxuu dareemayaa qandho iyo xanuun. Asagu ma oga inuu qabo jadeeco.



Joe weli ma laha furuurac laakiin mar hore buu noqday mid faafinaya jirrada. Wuxuu ku siidaynayaa feyraska hawada marka uu neefsado, hadlo, qufaco ama hindhiso.



Dhaqtarkaa ku arki doona hadda. Ka raali ahow sugitaanka dheer.



Feyrasku wuxuu ku sii jiraa hawada, xattaa kadib markii Joe uu baxo. Wuxuu hawada ku sii jiri karaa ILAA IYO 2 SAACADOOD. Qofkasta oo dhex mara qolka sugitaanka wuu jiidi karaa neef-ahaan.



Maxaa dhaca haddii cid ka mid ah dadkaan aysan qaadan tallaalka MMR oo qofna qaadin jaceedo weligiis? **Illaa 9, 10-kiiba, jadeecaa ku dhici doonta.**



Laakiin ka warran haddii kulligood la tallaalay?

Waxay u badantahay, QOFNA INUUSAN qaadi doonin jadeeco.

Tallaalka jadeecada (MMR) wuxuu bixiyaa difaac aad u xooggan. **2 irbadood waxtarkooda waa 97% xagga kahortagga caabuqa.**

Uma baahatid xoojiyaal dheeraad ah—difaaca laga helo irbadahaas wuxuu sii jiraa cimri-daa'im.

kingcounty.gov/measles

